**Foom Kooban oo aad ku bixinayso Oggolaanshaha Ka qaybgalka Cilmi Baarista**

Waxaa lagaa codsaday haddii aad doonayso inaad ka qaybgasho daraasad cilmi baaris ah. Ka hor inta aadan aqbalin ka qaybgalka daraasada, xubin ka tirsan kooxda daraasadu waa inuu uu sheegaa xogo ku saabsan daraasada. Waxaa laguu sheegi doonaa

a. ujeedada daraasada
b. waxaa kugu dhici doona inta daraasadu socoto
c. mudada ay daraasadu qaadan doonto iyo mudada lagaa codsan doono inaad ka qaybgasho
d. qayb kasta oo kamid ah daraasada oo tijaabin ah (wax la baaraayo)
e. khataro kasta ama qaybo kamid ah daraasada oo waxyeelo ku gaysan kara ama kugu abuuri kara dareen xun
f. faa'iidooyin kasta ood adigga ama dadka kale ka heli karaan daraasada
g. daawooyin kasta ama qaliino oo adigga faa'iido kuu ah halkii ay faa'iido u noqon lahaayeen daraasada (dookhyo gaar ah)
h. aqoonsiga qaar dadka lala wadaagi doono xigtaada
i. xog ku aadan sida arimahaaga sirta ah iyo xogtaada shaqsiga ah loo ilaalinaayo.

Shaqaalaha daraasadu waa inay sidoo kale kuu sheegaan xogta hoose haddii ay qusayso daraasadaan

a. haddii aad heli doonto wax magdhaw ah (lacag ama daawo caafimaad oo bilaasha ah) haddii dhaawac kusoo gaaro intaad ku jirto daraasadaan cilmi baarista ah
b. haddii ay imaan karto khatar aanan wax ka ogayn hadda laakiin dhici karta mustaqbalka
c. waxaa jiro sababo ay tahay in cilmi baarayaashu kaa joojiyaan ka qayb galka daraasada
d. qarashaad kasta oo kaaga bixi kara ka qaybgalka daraasada
e. waxa dhacaaya haddii aad doonayso inaad ka baxdo daraasada
f. marka macluumaad lagaa siinaayo natiijooyinka cusub oo keeni kara inaad badasho fikirkaaga ku aadan kusii jirista daraasada
g. cadadka dadka ka qaybgalaaya daraasada.

Kadib marka laguu sheego dhammaan xogta kore shaqalaaha daraasada ayaa ku waydiin doona haddii aad doonayso inaad qayb ka ahaato daraasada. Haddii aad oggolaato markaas shaqaalaha daraasada ayaa ku waydiin doona inaad saxiixdo foomkaan. Waxaa qasab ah in lagu siiyo koobiga foomkaan oo ku qoran luuqadaada hooyo. Waxaa sidoo kale lagu siin doonaa xogta kooban ee qoran ee draasada oo af Ingiriis ku qoran.

Turjumaan kaaga ayaa kusoo wici kara ________Name________ asagoo kaasoo wacaaya ______Phone______ mar kasta oo aad su'aalo ka qabto daraasada ama waxa aad samaynayso haddii dhaawac ku gaaro. Adigga ama turjumaankaaga ayaa wici kara xafiiska BUMC IRB ood ka helayso 617-358-5372 haddii aad su'aalo ka qabto xaquuqdaada markaad ka qaybgalayso daraasada.

Waxaad xor u tahay inaad go'aansato inaad doonayso iyo in kale ka qaybgalka daraasada. Adigga ayay ku jirtaa. Waxaad go'aansan kartaa inaadan ka qaybgalin daraasada. Waxaad go'aansan kartaa inaad qayb ka ahaato daraasada aadna joojiso xiligaad rabto. Haddii aad go'aan sato inaadan ka qaybgalin daeraasada ama haddii aad go'aansato inaad joojiso ka qaybgalkeeda ma lumin doontid wax faa'iidooyin ah oo aad xaq u lahayd. Ayadoon laga eegayn nooca go'aanka aad qadato waxba kama badalayso sida ay kuula dhaqmayaan shaqaaluhu laakiin haddii aad go'aansato inaad qayb ka qaadato daraasada cilmi baarista ah waxay badali kartaa qorshahaaga daawaynta.

Saxiixida dukumiintigaan waxay ka dhigan tahay in daraasada laguu sharaxay. Tani waxay ka dhigan tahay in laguu sheegay dhammaan xogta kore. Markaad saxiixdo foomkaan waxay ka dhigan tahay inaad aqbashay ka qaybgasho daraasadaan.

Magaca qoran ee ka qaybgalaha ____________________Saxiixa_________________ Taariikhda ________

Printed name of witness _________________________ Signature __________________ Date __________